UNITED NATIONS NATIONS UNIES

Office for the Coordination of Humanitarian Affairs – Somalia

Warbixinta Xaaladda # 45 – 14 November, 2008

Is-beddellada guud ee ugu muhiimsan

Toddobaadka gudihiisa, waxay hay'adda Biyaha Soomaaliya iyo maaraynta Xogta Dhulka (SWALIM) shaaca ka qaaday digniin xad dhaaf ah oo tilmaamaysa daadka sare u sii kacaya ee dhulka webiyada Shabeelle iyo Jubba, gaar ahaanna roobabka ka da'ay qaybo ka mid ah koofurta Soomaaliya iyo dhulka jooggiisu sarreeyo ee Ethiopia oo ah goobaha asal ahaan ay labada webi ka yimaadaan. Sida ay xaqiijisay hay'adda SWALIM, waxa si xad dhaaf ah sare ugu kacay joogga heerka biyaha webiyada, iyadoo biyo lixaad leh ay maasheeyeen Doolow, Luuq iyo Baardheere ee Gobolka Gedo, taasoo laga muujiyey halis dheeraad ah inay dadakaasi waxyeello u gaystaan dhul-hoosaadka webiga Jubba. Sida la saadaalinayo maalmaha soo socda, waxaa laga yaaba inay xaddiga roobabka halkaas ka da'aya ay ka fududaan heerarkii roobabkii caadiga ahaa ee looga bartay goobaha biya-qabatinka ah ee Shabeele iyo Jubba ee dhinaca Ethiopia iyo roobabka mihigaanka ah ee gudaha Soomaaliya ka da'aya. Waxana jirta halis dheeraad ah oo laga muujinayo daadadka labada webi inta lagu guda jiro toddobaadka soo socda. Meelaha dhul-hoosaadka waxaa mar hore bilowday Daaddadka maxalliga ah ee ku fatahmay deegaannada kala ah; Doolow, Luuq iyo Baardheere. Sida ay xaqiijinayaan warbixinnada gudaha laga helayo, qiyaastii ilaa 400 qoys ayaa ku bara-kacay daadadka magaalada Baardheere.
Waxayna Hay'adda WFP, qoysaskaas iyaga ah u qaybin doontaa bishan gudaheeda raashin gargaar ah oo waqti-keliya loogu talo galay.

Sidaas awgeed, waxaa dib isu abaabushay kooxda hawlgalka hay'adaha isku-dhafan ee Daadadka, iyadoo kulankeedii ugu horreeyey uu qabsoomay 12kii November. Waxaana kulankaas lagu heshiiyey in xogta halista daadadka meel la isugu uruuriyo, si marlkaas hore loogu hinqiyo gurmadka ugu habboon la loo baahan yahay.

Sida ay xustay warbixintii ugu dambaysay ee Dulmarka guud ee badbaada Cuntada dalka soomaaliya ee Shabakadda Digniinaga Hore ee gaajada (FEWS NET) ee Oktoober ilaa January 2009, ayaa waxay shaaca ka qaaday iaydoo ay is-biirsadeen abaaraha, dagaallada iyo Sicir-barkuba, inay si ba'an xaaladda Badbaada Cuntadu u sii xumaan doonto guud ahaan dalka. Waxayna Shabakadda FEWS NET, sii saadaalisay inay xaalad aad u qalafsan la soo dersi doonto dalka, haddii roobabka xilligan *Deyrta ah ay baaqdaan* ama yaraadaan, islamrkaana badbaadada cuntada goobaha ay abaaruhu saameeyeen ee dadka xoolo-dhaqatada ah, reer magaalka iyo qoysaska reer miyiga ah ee Bartamaha/koofurta Soomaaliya ay xaaladdoodu sii xumaan doonto, iyadoo in ka badan 3.5 million qof ay u baahan doonaan gargaar bi ni'aadminnimo.

Caqabadaha dhinaca nabadgalyada ah ee hortaagan hawlgalka Bini'aadminnimada, ayaa iyaguna ku sii kordhaya dhamman dalka Soomaaliya. Mohamed Osman, oo ahaa Madixii Xafiiska barnaamijka hay'adada maxalliga ah ee Mercy Corps, ayaa toogasho lagu dilay 9kii November isagoo ku sugnaa Jamame ee gobolka Jubbada Hoose. Sida lagu sheegay war-saxaafadeed ay hay'adda Mercy Corps soo saartay, hadafalka dilkaas ayaa lagu macneeyey fal-dambiyeed, iyadoo maamulka deegaankuna ay arrintaas baaritaan ku samaynayaan. Wuxuuna Mohamed Osman u xilsaarnaa maaraynta Barnaamijka Dib-u-soo-kabashada Koofurta Soomaaliya ee looga goleeyahay inay dadweynuhuu helaan dakhli badan oo dhaqaale oo ku habboon her-nololeedkooda, marka ay ku hawlan yihiin dhismaha Kaabayaasha deegaannada ay bulshooyinkoodu ku dhaqan tahay.

Isniintii dhaweyd ee 10kii November, waxa Degmada El Wake e gobolka waqooyi- bari Kenya lagu af-duubay labo Sooro oo Talyaani ah, waxaana loola gudbay xadka Koofurta dalka Soomaaliya.

Hay'adda WFP Somalia, ayaa iyaduna waxay u qaybisay gargaarka cuntada nafaqada leh oo dhan ilaa 7,570 mt ee noocyada Corn Soyo Blend (CSB), taasoo ay ku deegqay hay'adda USAID. Deeqdani waa mid muhiim u ah dadaalka gurmadka hay'adda WFP ee ay ku gargaarayso dadweynaha nafaqo-darridu ku habsatay ee Soomaaliya, iydoo xilligan uu barnaamijka la soo

dersay baahi lixaad leh ee cuntada nafaqada leh(CSB),iyadoo ay weli dhibaatooyin ka jiraan baahida gargaarka noocyada aan cuntad miraha ka ahayn.

Dhanka kale, maraakiibta badda ee waddanka Holland iyo labo ka mid ah maraakiibta dagaalka NATO (Giriigga iyo Talyaaniga) ayaa badbaadiyey markab hay'adda WFP u rarnaa oo siday 58,970 mt oo cunto gargaar ah oo loo siday Soomaaliya, kuwaasoo loo adeegsaday siddeed markab oo ku guushayey biyaha Soomaaliya. Waxaana jadwalka Rashina ee Bisha November loo qorsheeyey inuu ku filaan karo quudinta ilaa 2.3 million qof muddo loix toddobaad ah.
Raashin gaarayey ilaa 47,970 mt oo isugu jira noocyada cuntooyinka isku-dhafan, ayaa loogu talo galay sida jadwalka ku xusan in loo gudbiyo koofurta Soomaaliya, halka inta kaalna maraakiib loogu gudbin doono waqooyiga dalka. Bisha November, ayaa ugu yaraan 2.3 million qof oo Soomaali ah, waxaa la gaarsiin doonaa ilaa 39,000 mt oo noocyada cunyada isku-dhafan. Ilaa bishii Oktoobe marab laga leeyahay dalka Holland oo kaashanaya Giriigga iyo talyaaniga ayaa galbinayey lix markab oo xeebaha soomaalga garsiinayey ilaa in ka badan 48,400 mt oo cunto gargaar ah.

Wixii Faahfaahin Dheeraad ah ee xogta Afka Ingriiska kala xidhiidh: Rita Maingi tel. 254 734 800 120 – *maingi@un.org*,
Xogta Afka Soomaaligana kala Xidhiidh: Mona Mohamed on 0733 643 737 – mohamed26@un.org
Cinwaanka Shabakadda:http://ochaonline.un.org/somalia